

# Macluumaad kugu socda adigaaga dugsiga sare ka qalin jebinaaya iyo adigaaga xigtada

2021-05-21

## Waad salaamantihiin!

Waqti dhaw waxaa la gaarayaa waqtigi loo dabbaal degi lahaa qalin jebinta dugsiga sare!

Waxaan aad ugu faraxsannahay in aad dhameysatay waxbarashadaadi dugsiga sare iyo in aad isla mar ahaantaas ogaal u leedahid in waqtigaagi dugsiga sare ee sannadki aafada ee la soo dhaafay uusan noqon sidi adiga iyo annaguba aan filneynay. Waxaan sidaas oo ay tahay rejeeyneynaa in aad dareemeysid in aad diyaar u tihid in aad qaaddid tallaabta xigta ee noloshaada.

Qalin jebintu waxay kuu tahay billaw muhiim ah, billawga taariikh cusub oo noloshaada ka mid ah. Ardayda dugsiyadeenna sar-sare waxay xitaa sannadkan u dabbaal degayaan si markii hore ka duwan laakin hadafkeennu waa in adiga ka arday ahaan ay waxbarashadu si wanaagsan kuugu dhammaato iyadoo ay xitaa taagantahay xaaladdan adagi. Dabbaal degga ardayda ee Norrköping waxaa loo qaban doonaa si waafaqsan talooyinka iminka taagan ee Hey'adda caafimaadka bulshada si loo yareeyo faafitaanka cudurka covid-19.

Macluumaadka hoos ku qoran ayaa sharraxaya waxyaabaha khuseeya ardayda Norrköping, iyo waxa ay tahay in ka fikiraan ardayda ama xigtadu si loo qabto dabbaal deg arday oo guuleysta, aaminna ah marka laga eego dhanka faafitaanka cudurka. Waxaad xitaa iskoolkaaga ka heli doontaa macluumaad dheeraad ah oo faahfaahsan.

## Waad ku mahadsantahay in aad mas'uuliyad qaadeysid oo aad sameyneysid wixi dhankaaga ah si loo yareeyo faafitaanka cudurka

Qof walba waxay mas'uuliyadi ka saarantahay in ay yareyso faafitaanka cudurka covid-19, sidaas darteedna waa muhiim in aad raacdid talooyinka guud iyo xannibaadaha markaas jira.

Dhammaan dadka ka qeyb gelaya qalin jebinta **waa in ay ahaadaan kuwo caafimaad qaba**, waana in ay qaataan mas'uuliyaddooda oo aysan imaan haddii ay leeyihiin calaamado cudur sida qufac, dhuun xanuun, diif, feebaro ama madax

xanuun. Waan ognahay in aad adigu ka arday ahaan horbaba qaadatay mas'uuliyad aad u weyn intii distans wax lagu dhiganayay iyo intii lagu jiray xaaladihi bulshanimoo ee kala duduwanaa. Waxaan adiga ka arday ahaan iyo ka xigto ahaan idinku boorrineynaa in qalin jebinta loogu dabbaal dego si mas'uuliyadi ku dheehantahay, oo xitaa laga sii qeyb qaato yareynta faafitaanka cudurka.

## Koofi qaadashada

Koofi qaadashadu waxay qeyb muhiim ah ka tahay usbuuca ardayda, waxaana 4 Juun fasal-fasal loogu sameyn doonaa iskoolka gudihiiisa. Ma jiraan wax xigto ah oo markaas ka qeyb geli doona. Iskoolkaaga ayaa ku siin doona faahfaahinta ku aaddan koofi qaadashada iskoolkaaga.

## Dibad u ordidda – waxaa goob joog ka ahaan kara 2 xigto oo keliya

Bogga intarneetka ee iskoolka ayey ku jirtaa warbixin ku aaddan maalmaha iyo waqtiyada uu fasal walba goonidiisa dibadda ugu ordi doonyo.

Dibad u ordidda waxaa lagu sameyn doonaa qaab aamin ah oo masaafo leesu jir-jirsan karo. Maamullada oo dhan ayaa qiimeyn khatarta ku sameynaya si ay u hubiyaan in dibad u ordidda loo sameyn karo si aamin ah. Taasi waxay ka dhigantahay in:

- Dib u ordidda waxaa loo sameynayaa fasal-fasal. Iskoollada qaarkood waxaa dibad u ordidda la sameynayaa laba maalmood – maalinta khamiista ee 10 Juun iyo maalinta Jimcada ee 11 Juun.
- Laba qof oo xigto ah oo keliya ayaa dibadda iskoolka joogi kara marka ay dibad u ordiddu dhaceyso. Xigtadu waa in ay joogtaa dhismada dibaddeeda.
- Waa in ardaydu ay dibad u ordidda ka dib dhakhsi u raacaan xigtadooda ama ay iskood uga tagaan aagga iskoolka si iskoolku uu u diyaariyo dibad u ordidda xigta.
- Ardayda ama xigtada aan si buuxda u caafimaad qabin ama leh calaamadaha covid-19 waa in ay guriga joogaan si aysan dadka kale khatar ugu gelin cudur qaadsiiinta.
- Maskaxda ku hay in aad masaafo u jirsatid dadka kale ee goobta jooga.

## Toos u baahinta dibad u ordidda

Marka laga reebo labada qof ee xigtada ah ee marka dibad u ordiddu dhaceyso dibadda iskoolka joogi kara, waxaan u suurta gelineynaa qoyska intiisa kale iyo xigtada aan goobta joogin in ay sidaas oo ay tahay ka qeyb qaataan dabbaal degga qalin jebinta. Sidaas darteed toos ayaan u baahin doonnaa inta ugu badan ee dibad u ordidda fasallada si ay xigtadu digital ahaan uga qeyb qaataan.

Iskoollada soo socda toos ayaa dibad u ordidda looga baahin doonaa: Dugsiyada sar-sare ee De Geergymnasiet, Ebersteinska gymnasiet, Hagagymnasiet, Norrköpings Lärlingsgymnasium och Kungsgårdsgymnasiet.

Dugsiga sare ee Bråvallagymnasiet toos dib u ordidda loogama baahin doona. Taasna waxaa ugu wacan in dibad u ordiddu ay Bråvallagymnasiet ka dhaceyso albaabbo kala duduwaa oo iskoolka ka mid ah iyo in ay iska barbar soconeyso. Sidaas darteed maaha wax caqli gal ah in toos loo baahiyo.

Waxa la baahinayo ee ku aaddan dibad u ordidda lama kaydinayo, waxay taasi ka dhigantahay in aysan soconeyn in wixi la baahiyay qofka loogu soo celiyo. Linkiyada wax laga baahinayo ee iskool walba u gooni ah waxaa maalinta ardayga ka hor lala soo dirayaa ardayda.

## Socodka ardayda

Socodka ardayda looma fulin karo si aamin ah marka laga eego dhanka talooyinka Hey'adda caafimaadka bulshada, sidaas darteedna waa la baajiyay.

## Gaari isla raacidda ardayda

Sida ay qabto Hey'adda caafimaadka bulshadu maaha in ay dhacdo in ay ardaydu koox-koox gawaari waaweyn isula raacaan. Sidaas darteed gawaari isla raac-raacidda ardayda waa la baajiyay Norrköping. Haddii gaari weyn la ballansaday waxaan ku talineynaa in ballantaas la iska baajiyo. Shirkado badan oo raba in ay kireeyaan gawaari waaweyn ayaa waxay dadka siiyeen macluumaad ay ku doodayaan in gawaarida waaweyn ay ardaydu isla raac-raaci karaan, taasoo aan run ahayn.

[Macluumaadka Hey'adda gaadiidka - Gawaarida waaweyn ay ardaydu isla raacaan iyo socodka Karnefaalka](#)

## Xaflado iyo nashaadaad

Haddii xaflado gaar-gaar ah la qabsanayo waxaa ugu badnaan isu imaan kara **siddeed qofood**, sida ku cad tilmaamooyinka Hey'adda caafimaadka bulshada. Waxaa dhici karta in ay 1 Juun yimaadaan talooyin qaran oo cusub, sidaas darteed mas'uuliyadda qof ahaaneed ee in xaaladda lala socdo wey weyntahay.

Marka laga duulo talooyinka iminka shaqeynaya waa in sidii horaba laga fogaado in la qabto xaflado arday oo waaweyn iyo in fasallada meelo ka baxsan lagu kulmo. Iminka lama joogo waqtigi la isugu imaan lahaa xaflado waaweyn. Taas beddelkeeda kul-kulma idinkoo kooxo yar-yar ah, raadsadana siyaabo kale oo aad u dabbaal degtaan. Waxaa sii fiican in aad dhismooyinka dibadda ka joogtaan. Lama oggola in maqsinno loo kireeyo si ugu kulmaan in ka badan siddeed qofood Bogga norrkoping.se ayaad ka akhrisan kartaa wax dheeraad ah oo ku aaddan talooyinka iminka taagan.

[Talooyinka iyo tilmaamooyinka iminka taagan - Norrköping](#)

## Xafladaha basaska dushooda

In tusaale ahaan la kireysto bas si loogu xafladeeyo baska dushiisa waxaa loo arkaa isu imaatin gaar ah, waxaana markaas qabanaya sharciga ku aaddan kireynta maqsinnada si tusaale ahaan xaflado gaar ah loogu qabsado. Waa qofka kireynaya maqsinka (tusaale ahaan baska) cidda ka mas'ulka ah in aan loo isticmaalin isu imaatin gaar ah oo ka badan siddeed ka qeybgale. Haddii aad bas qabsatay si aad qalin jebinta ugu dabbaal degtid waxaan ku talineynaa in aad iska baajisid.

[Macluumaadka Hey'adda adeegga bulshada ee ku aaddan xafladaha basaska dushooda](#)

## Lugeynta ardayda – dad waaweyn oo aamin ah inta lagu jiro usbuuca ardayda

Muddo lix fiid ah inta u dhexeysa saacadaha: 18.00-01.00 waxaa magaalada ku dhex wareegaya Elevhälsan iyo Kaniisadda Iswiidhishka. Waxaa laga heli karaa 011-24 60 00 iyo khadka sms-ta 0702-96 26 67. Qofka lala xiriiri karo waa Maria Bard oo laga helo Diakonicentrum DC, [maria.bard@svenskakyrkan.se](mailto:maria.bard@svenskakyrkan.se)

## Maxay talooyinku ka dhiganyihiin?

Hey'adda caafimaadka bulshadu waxay soo saartay talooyin ku aaddan sida dabbaal degga ardayda loo sameyn karo iyadoo laga duulayo xaaladda aafada ee iminka taagan. Talada ay hey'ad dowladeed soo jeediso maaha wax sharci ah Iswiidhan. Hey'adaha dowladdu ma go'aamin karaan sharciyada. Laakiinse waa waxa ugu adag ee ay hey'adi dhihi karto. Waxay taasi ka dhigantahay in aan sameyneyno waxa ay hey'addu dhahdo. Waxaa tusaale ahaan talooyinkaas ka mid ah:

- Fasallo iskool oo gaari weyn iyo wax la mid ah isla raaca maaha in ay dhacdo
- Xaflado, kulamo ama bandhigyo waaweyn oo ay u dhanyihiin ardayda qalin jebineysa ama iskoolka oo dhan maaha in la abaabulo.

[Macluumaadka Hey'adda caafimaadka bulshada ee ku aaddan xafladaha qalin jebinta ee sannadkan](#)

## Masaafu isu jir-jirsada, gacmahana dhaqda

Maskaxda ku hay in aad dadka kale masaafu u jirsatid iyo in aad gacmaha dhaqatid. Wadajir ayaan u hakin karnaa faafitaanka cudurka.

Bogga [norrkoping.se/studenten](http://norrkoping.se/studenten) ayaan ku cusbooneysiineynaa macluumaadka ku aaddan dabbaal degga qalin jebinta ee sannadkan.

## Su'aalo iyo xiriir

Haddii aad qabtid su'aalo ku aaddan xafladda ardayda waxaad la xiriiroysaa macallinka aad hoos timaadid. Kontaktcenter ayaa sidoo kale lagala xiriiri karaa 011-15 00 00 ama khadka e-mailka [norrkoping.kommun@norrkoping.se](mailto:norrkoping.kommun@norrkoping.se)

Waad ku mahadsantahay shaqadaadi wanaagsaneyd ee sanadka oo dhan, waana kuugu hambalyeyneynaa waxbarashada aad dhameysatay. Waxaan rejeeyneynaa in waxbarashada dugsiga sare ay si fiican kuugu dhammaato in kasta oo ay jirto xaaladda iminka taagan.

Salaan diiran

Claes Göransson, madaxa hawlaha ee dugsiga sare

Jonas Eriksson, madaxa hawlaha ee dugsiga sare

Sofie Lindén, diritoorka waxbarashada